

Ubedel dhirta garanwaaga ah dhuxul lacagna ka samee

Qof waliba dhuxul buu doonayaa, sidaana uma jabna laakiin garanwaa baa meelwalba kuyaal waana bilaash! Sida dhuxusha loo sameeyaa way fududahay- faa' iidooyinka dhaqaalena way badan yihiin waxay u baahantay in yar oo aqoon ah, god dhuxuleed, suuq iyo wakhti yar...

Jar



Jar dhirta waaweyn, qodna kuwa yaryar oo xiddidka u saar. Dhamaan xiddidada iyo laamaha ka dhumuc weyn suulkaagu way samayn karaan dhuxul in kastoo dhirta iyo laamaha waaweyni ay sii fiican yihiin. Qoryaha dhaadheer ee toosan waxa loo iibin karaa dhismaha waxayna ku iibsami karaan qiimo wanaagsan.

Nadiifi



Jiridaha geedku dhakhso ayey u korayaan, sidaa darteed inaad kashaqaysataa waa qayb kamida korinkiisa. Jiridaha dhirta yaryar waa in laga goyaa ama la gubaa. Ururi laamaha oo dhan hadii kale waxay reebayaan qodax waxyeelo leh mustaqbalka.

Dabool



Dadka qaar baa isticmaala godad dhuxuleed ay ku daboolaan biro ama jiingado qaarkale waxay sameeyaan tuulal ay ku daboolaan ciid. Xansas baa loo baahan yahay dabka lagu huriyo jiridaha iyo laamaha waaweyn waxa la dhigaa dhaxda dabeeto dab baa lagu qabtaa. Maalin walba ishaa lagu hayaa.

Cabee



Markay gubistu dhamaato taasoo qaadata dhawr maalmood godadka yaryar kuwa waaweynna 10-12 maalmood, waa la bakhtiiyaa waxana lasugaa dhawr maalmood si ay u qaboowdo. Godka kaqaad daboolka ama tuulka ciida ka rog oo kiishash / jawaano ku cabee.

Iibi. Waxaad iminka lacag ka samayn kartaa garanwaaga. Maraykanka dhuxusha garanwaaga oo la yidhaado *mesquite* ayaa ugu qaalisan sababtoo ah dhadhanka wacan ey siiso hilibka lagu kariyo. Arintaa ku hal qabso markaad baayactamayso.